DANISH HEALTH AUTHORITY

corona | covid-19

Talo ku socota waalidiinta

– Haddii xaalad korono fayras/COVID-19 la xaqiijiyo gudaha goobta daryeelka carruurta, dugsiyada iyo goobaha kale ee carruurta iyo dhalin yarada.

31.07.2020

Maxaa dhacay haddii xaalada korono fayraska/ COVID-19 la xaqiijiyo xaga goobta daryeelka caafimaadka/dugsiga ilmahayaga iwm.?

Haddii ilmaha laga heli korono fayraska/COVID-19, Masuuliyiinta Caafimaadka Dheenisku waxya ku talinayaan in waalidka ilmahu uu ku wargeliyo goobta daryeelka carruurta/dugsiga, iwm.

Haddii goobta daryeelka caafimaadka/dugsiga ilmahaagu iwm, la wargeliyo in ilmaha uu qabo korono fayraska, waxaa lagu talinayaa in maamulku ku wargeliyaan dhammaan xubnaha shaqaalaha iyo waalidka – iyagoon bixin macluumaad ku saabsan aqoonsiga ilmaha cudurka qaba – soo dhejinaya ogaysiis, iimayl ahaan, ama xidhiidhka intaraanatka ee madashada waalidka ama wax la mid ah.

Waxaa sidoo kale lagu taliyay in maamulku uu caawiyo raad raaca caarruuta/qofka da'da yar.xubnaha shaqaalaha ee kale kuwaas oo loo qeexay sida xidhiidhada dhow ee qofka qaba cudurka.

Haddii maamulka goobta daryeelka carruurta/dugsigu dejiso in ilmahaagu uu ilmahaagu xidhiidh dhow la lahaa qof qaba, waxay kuula soo xidhiidhi doonaan si toos ah. Waxaad sidoo kale heli kartaa Coronaopsporing (Raad raaca Koroonaha), qaybta Masuuliyiinta Badbaada Bukaanka Dheeniska oo ka caawiyaraad raaca xidhiidhka.

Keliya waalidka carruurta loo arko inay xidhiidh dhow u yihinn qofka qaba ayaa si toos ah loola soo xidhiidhaa.

Xidhiidhada dhow waxaa loo qeexaa sida dadka aad la lalhayd xidhiidh dhow muddo wakhti ah. Xidhiidhada dhow ee carruruta ay ku jiraan carruurt akale ama dadka waa wayn ee ku jirta goobta daryeelka caafimaadka, dugsiyada iyo naadiyada firaaqada kuwaas oo lalahaa taabashada jidhka ee tooska ah ilmaha, ama la ciyaaraysay fogaan ka yar hal mitir wixii ka badan 15 daqiiqo.

Maxaad samayn lahayd haddii ilmahaagu uu xidhiidh dhow la leeyahay qofka qaba cudurka?

Sharci ahaan, carruurta waa inay raacdo tilmaamaha isku midka ah sida dadka wa wayn, waxa loola jeedaa, in ilmaha lagu hayo guriga oo la baadho. Si kastaba ha ahaatee, waxaad dooran kartaa inaadan baadhin carruurta ka yar 12 maadama uu dhib ku noqon doono nidaamku.

Akhri Hagitaankayaga *Waxa la samaynayo haddii aad xidhiidh dhow la leedahay qof laga helay cudurka korono fayraska cusub.*

Maxaan sameeyaa haddii ilmaha uu qabo astaamaha COVID-19?

Carruurta waa inay guud ahaan raacaan hagitaan la mid ah ka dadka waa wayn. Ku hay carruurta guriga oo la xidhiidh dhakhtarkaagaqiimaynta iyo laga yaabaa si loo helo gudbinta baadhoda.

Akhri hagitaankayaga *Waxa la samaynayo haddii aad qabto astaamaha COVID-19.*

Maxaan samaynayaa haddi ilmahayga laga helo cudurka?

Carruurta waa inay guud ahaan raacaan hagitaan la mid ah ka dadka waa wayn. Haddii ilmahaaga laga helo cudurka korono fayraska, waxaa kila soo xidhiidhi doona Coronaopsporing (Raad raaca Koroonaha), waaxda ka mid ah Masulliyiintabadbaadada Bukaanka Dheeniska. Waxay caawin karaan raad raaca xidhiidhada ilmahaaga. Waxaad sidoo kale kala xidhiidhi kartaa Coronaopsporing (Raad raaca Koroonaha) laftaadu telefoonka 32 32 05 11.

Waxaanu ku talinaynaa inaad ku wargeliso waaxda daryeelka caafimaadka ilmahaaga/dugsiga markaas waalidka carruurta kale ee qaaday caabuqa waa la wargelin karaa, oo markaas carruurta kale waa la baadhi karaa.

Akhri hagitaanka *Waxa la samaynayo haddii baadhitaanka laga helo koronofayraska cusub.*

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan jirada ilmahaaga, fadlan **wac dhakhtarkaaga.**

Haddii aad qabto su'aalo kasta ku saabsan raad raacaaga xidhiidhka ama baadhida, fadlan soo wac **Coronaopsporing** (raad raca Koronaha) **telefoonka. 3232 0511.**

Haddii aad qabto su'aalo, waxaad soo waci kartaa **dowladda Dheenishka khadka tooska ah ee tel. 7020 0233**.

Macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan koronofayraska cusub/COVID-19

COVID-19 waa magaca cudurka sababa korona fayraska cusub

Caabuqa

Si looga hortaggo faafida cabyqa, wa amuhiim in la ogaado sida korona fayraska cusub loo gudbiyo.

Ku gudbinta dhexda taabashada Isku gudbinta taabashada oogooyinka ama sheeyada ay isticmaaleen dad cabuqa qaba, iyo markaa taabshada sankaaga, indhaha ama afka. Khatarta isku gudbinta taabashada waxaa lagu yarayn karaa ku dhaqanka nadaafada wanaagsan ee gacanta iyo hubinta in si buuxda loo nadiifyo.

Ku gudbinta dhibcaha yaryar Isku gudbinta qof ilaa qof kale iyaddoo maraysa dhibcaha yaryar ee ka soo baxay marinada hawada (neef mareenka)marka qof qabaa qufaco, hindhisao, iwm. Dhibacaha yaryar waxay ku dhacaan dhulka gudaha hal ama labba mitir, oo markaas khatarta isku dubinta dhibcaha yaryar waxaa lagu yareeyaa kala fogaanshaha bulshadda.



Astaamaha

Calaamadaha Caadiga ah ee COVID-19

Qufac qalalan
Heerkulka aad u sareeya
Dhibaatooyinka needsashada
Boogta hunguriga
Madax xanuun
Xanuunka muruqa

Si looga hortago faafida caabuqa

Shayga ugu mihiimsan ee la samaynayo si ahmiyada:

1. Karantiimaynta dadka muujiya staamaha iyo raad raacida cida ay xidhiidhka dhow la lahaayeen
2. Ku dhaqanka nadaafada wanaagsan ee xooga saaraysa qaabka qufaca (nadaafada neefsashada), nadaafada gacanta iyo meelaha taabashada.
3. Kala fogaanshaha bulshadda xooga saaraya fogaanta, inta jeer, muddada iyo caqabadaha

Haddii aanad awoodin inaad u hogaansanto mid ka mid ah tallooyinka, hubi inaad u hogaansanto kuwa kale.